



Orientation to Ontario

EEDAABTA GAADIIDKA DADWAYNAHA

Deegaanno badan oo ku yaala Ontario ayaa leh nidaamka gaadiidka dadwaynaha sida tareenada, subway, gaadiidka dheeraaya ee fudud (LRT), iyo tagaasida iyo basaska.

Astaannada iyo Xarumaha:

- Gaadiidka dadwaynaha ayaa istaaga astaannada ama goobo joogsi oo loo asteeyay.
- Dhammaan gaadiidka dadwaynaha ayaa shaaciya meesha xigta ee ay staagayaan waxayna kusoo bandhigaan shaashad.
- Astaannada gaadiidka qaarkood ayaa leh har yar halka qaar kale leeyihiin keliya boor aqoonsi ah.
- Darawallada gaadiidka ayaa istaaga marka ay arkaan qof ku sugaaya astaanka.
- Rakaabka ayaa riixi kara batoon ama jiidi kara fiilo si ay uga codsadaan darawalka inuu joogsado.
- Astaannada gaadiidka ayaa loogu talagalay badanaa tareennada, basaska iyo LRT yada. Waxay leeyihiin har, kuraas, xog, dukaanno iyo musqulaha dadwaynaha.
- Tareennada iyo basaska ayaa istaaga astaannada muddo loo cayimay, xataa haddii uusan qofna sugayn uusana jirin qof codsaday in loo istaago.

Marinnada iyo Jadwallada:

- Nidaamyada gaadiidka ayaa leh marinno gaar ah - khariiradaha iyo jadwallada ayaa laga heli karaa oonlaynka iyo astaannada.
- Jadwallada ayaa isbadeli kara maalmaha dhammaadka asbuuca iyo maalmaha fasaxa.

- Nidaamyada gaadiidka ayaa adeegsada webseedyadooda, raadiyaha iyo baraha bulshada si ay u shaaciyaan dib u dhacyada.

Ababka taleefannada ayaa kaa caawin kara qorshaynta safarkaaga, hubinta jadwalka iyo inaad ogaato xiliga gaariga xiga imaan doono.

Bixinta Lacagta Bas raaca

- Marka aad korto gaari, bixi lacagta bas raaca oo ah cadadka go'an ee lagaa rabo maadaama uusan darawalku ku siin karin sarif.
- Waa sharci daro inaad basaska raaco adoon lacagta bixin - waxaa lagugu xukumi karaa ganaax.
- Ka iibso tigidhada ama boonooyinka bas raaca astaannada iyo dukaannada qaar.
- Haddii aad qorsheynayso inaad basas badan iskaga kala wareegto marar badan isku hal maalin, waxaad iibsan kartaa tigidhka maalinta oo dhan.
- Ka iibso bas raacaaga iibiyaasha sharciga ah si aad iskaga ilaaliso kaararka basraaca been abuurka ah ama lasoo xaday.

Kala wareegga

- Marka aad bixiso lacagtaada bas raaca, kasoo qaado waraacda ku wareegida baska cusub mashiinka ama darawalka si aad ugu wareegto bas cusub.

Raacista Gaadiidka Dadwaynaha: ixtiraam shaqaalaha basaska oo raac tilmaamahaan:

- Laynka gal si aad u raacdo baska aadna ugu sahasho dadka kale inay soo baxaan marka hore.



1-855-626-0002
<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par

- Ha riixin dadka jooga astaan saxmad badan ama gaariyaasha oo ha iska bixin boorsadaada dhabarka.
- Ka durug albaabada kadib marka aad gasho gaariga.
- Kursiga ugu kac dadka waayeelka ah, haweenka uurka leh, dadka naafada ah iyo dadka la safraaya ilmaha yaryar.
- Cagahaaga iyo boorsooyinkaaga dhulka ku hay.
- Adeegso sameecadaha dhagaha si aad u dhageysato muusig oo u hadal si dagan marka aad taleefanka ku hadlayso.
- Wasakh ha uga tagin baska.
- Sigaarka looma ogola gaariyaasha, astaannada joogsiga iyo xarumaha basaska.

Gaadiidka La Heli karo

Nidaamka gaadiidka dadwaynaha ee Ontario ayaa leh gaariyaal ay geli karaan dadka naafada ah ee adeegsan kara gaari curyaannada ama kaaliyaasha kale ee dhaqdhaqaaqa, sida ulaha ama bakoordaha si ay gaariga u fuulaan.

Waxaa sidoo kale jira adeegyada gaadiidka siga gaarka ah loo geli karo kaasoo ay qasab tahay in xili hore la codsado. Qiimaha ayaa la mid ah kan gaadiidka maxaliga ah, laakiin qofku waa inuu u qalmaa adeegga. La xariir nidaamka gaadiidka dadwaynaha ee maxaliga ah si aad u hesho xog la xariirta gaadiidka la geli karo.

TAGAASIDA IYO GAARIYAASHA OONLAYNKA AH

- Tagaasida waxaa maamusho dawlada darawalladuna waa inay wataan ruqsada gaariga. Tagaasidu waxay adeegsadaan cabir. Adeegyada tagsiyada qaarkood ayaa qiimo cayiman lagu tagaa safarada dhaadheer.
- Deegaannada waawayn ayaa sidoo kale leh ababka Tagaasida Oonlaynka ah sida Uber iyo Lyft, kuwaasoo kuu sahlaaya inaad codsato aadna lacagta kasiiso darawalka taleefankaaga. Darawaladaan ma haystaan ruqsadaha tagsiga.

